# ADDUUNYO WAA SHEEKO IYO SHAAHID

**WAXAA KU QORAN 23 SHEEKO IYO 340 MURTI, IYO MAAH-MAAH, 15 WEEYDIIN IYO WAX KA DHEH**

**Qore: XASAN YAAQUUB (Baabraqiis)**

**Waxaa lagu daabacay M. Qaranka — 26 Febbraio 1974**

# ADDUUNYO WAA SHEEKO IYO SHAAHID

**WAXAA KU QORAN 23 SHEEKO IYO 340 MURTI, IYO MAAH-MAAH, 15 WEEYDIIN IYO WAX KA DHEH**

**Qore: XASAN YAAQUUB (Baabraqiis)**

**Waxaa lagu daabacay M. Qaranka — 26 Febbraio 1974**



**Jaalle Xasan Yaaquub «Baabraaqiis»**

## «ADDUUNYO WAA SHEEKO IYO SHAAHID»
## NIN LA DHACAY

Sheeko: nin baa ka soo safray reerkiisii, isagoo sita qumbe subag ah iyo wan buuran oo Toddoba jir ah, markaas baa laba tuug aragtay oo ey yiraahdeen war sidee uga xadnaa ninkaas wanka iyo subagga?

Markaas baa mid wuxuu yiri annaa indhaha iska ridaayee isoo raac markaas buu indhaha xanjo marsadey oo istaagey jidkii ninka soo marayey Waryaa sharqamay? Waa anigoo safar ah, war magaaladii igey, hoo wanka ii qabo, oo usha keenso? Markaas baa tuugii kale wankii furtay, war xarigeyga xoollo kuma jiraan ee qumbaha ii dhiib, ee wankii raadi, markaas buu isna qumbihii la carrarey ninkiina halkaas baa lagu dhacay.
Sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## NIN IYO KURTUN

Nin baa isagoo guureynaya goor habeen barkii ah baa wuxuu arkey wax madow oo uu ka yaabay, markaas buu iska fariistay, oo soo jeeday habeenkii oo dhan isagoo moodaaya bahal, markaas baa waagii baryey, markaas buu wuxuu yiri ma waxaan ku moodayey mase waxaad noqotay mase waxaan loo noqon doonin, waxaan ku moodaayey bahal, waxaadse noqotay kurtun, waxaanse loo noqon doonin guuro habeen.
Sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## TUUG DAHAB XADAY

Nin tuug ah baa ka xaday, nin Suldaan ah laba kabood oo dahab ah, markaas buu haddana wuxuu arkay dameer laba jawaan oo dahab ah, saaran tahay, markaas buu damcay in uu ninka dameerka wata inuu ka xado dameerka dahabka sida, markaas buu jidkii uu ku soo socday buu kab dahab ah dhigay oo cabbaar meel u jirta midii kalana uu dhigay, markaas baa ninkii dameerka watay baa arkay kabta dahabka ah oo meesha taal, markaas buu iska dhaafay, cabbar markuu socday buu arkay kabtii kale, markaas buu dameerkii ku xirtay meeshaan kabtu taal, oo raadshey tii kale oo uu soo dhaafay, markaas baa tuuggii xaday dameerkii iyo dahabkii.
Sheekadii halkaas ha noo joogto.

## NIN IYO SHAYDAAN

Nin baa shaydaan aad iyo aad u nebcaa Sharka Cawdu Bille oo u diri jiray shaydaan maalin walba kun nacaladood markaas buu isagoo hurda u yimid oo wuxuu yiri war toos daartaadii waa duntaye, waa qofma qofka ila hadlaya? War waa anoo shaydaan ah, war wax daran alla kugu jirabye orod naga tag, soow kuuma soo diri jirin kun nacaladood maalin walba. Sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## NIN NAAGTIISII DILAY

Nin baa reer gabar ka guursaday, markuu laba bilood qabay bey ka carartay markaas baa la waayey meel alaala meel ey aaday, markaas buu u tegay reerkii uu ka soo guursaday, markaas buu wuxuu yiri gabartii ma aragteen waan waayey. markaas bey waxay yiraahdeen gabadayadii baan kaa rabnaa?

Markaas bey qaalli u dacwoodeen oo waxay yiraahdeen ninkaan gabar buu naga dilay, oo keeneen afar markhaati ah; goortaasaa Qaaligii ku xukumay labaatan sanno. Labaatankii markuu soo dhammaystay buu gurigiisii yimid, markaas buu wuxuu ku arkay magaalada naagtii loo xiray darteed, markaasuu dilay, waxaa dacwad labaad dacweeyey Aabbaheed, markaas buu yiri qaalliyow ninkaanu gabar buu iga dilay, Qaalligii baa wuxuu yiri ma dishay gabadhaas, Qaalli waan dilay gabadhaas waase tii aad labaatanka sanno igu xirtay hadda ka hor, markaas baa qaalligii yiri dambi ma leh. Sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## E E D   S H E E G A D

Nin baa wuxuu soo koriyey laba wiil oo uu midna dhalay midna uu adeer u yahay, markii ey qaangaareen buu wuxuu u yeeray midkii uu adeerka u ahaa wiilkaan adeerka u ahaayow siddeed iyo toban sannaan ku soo korinayey maxaad iga sheeganaysaa oo ah eexasho adiga iyo wiilkeyga?

Haah oo waan ka sheeganayaa, maalintii geeleenu dhumay aniga waxaad iiga dirtay, qorax ka soo bax, wiilkaagana qorax u dhac, markaan sii socday waxaa i gubtay qoraxdii subxeed markaan soo socdayna waxaa i gubtay qoraxdii galbeed Sheekadii hakaa ha inno joogto.

## LIBAAX IYO DACWACO

Libaaxbaa dugaag oo dhan midba mar u yertey goor ji-laal ah, kii u yimaadaba waa cunaa, markaas buu wuxuu u yee-ray dawaco oo ugu dambeysay bahal loo yeero, markey u timid bey istaagtey godka iridiisa markaas buu yiri libaaxii naa soo gal, maxaan soo galaa raad sii socda mooye, raad soo socda ma leh. Sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## NIN WAN LOO QALAY

Nin baa reer ku soo hoyday socdal ah, reerkii baa waan u qalay markaas buu wuxuu yiri asagoo fakaraya abboyow ma neefka oo dhan baa laguu keenayaa hilibkiisa mase jeex baa laguu keenayaa mase afarta addin baa laguu keenayaa mase leg iyo bari baa laguu keenayaa markaas baa waxaa loo keenay labatagoogo, markaas baa wuxuu yiri abbooyow laba kale ba isisaaraye laba tagoogo isma saarin, sheekadii halkaas ha noo joogto.

## DABBAAL DAMEER LAGA XADAY

Nin dabbaal ah oo laba dameer oo caata ah watay baa wa-xaa ka hor yimid nin dameer buuran wata markaas buu wuxuu yiri dameerkaan buuran seebaad u cayilisay anigu labadaydu waa caatee, markaas buu asigoo ku dheel dheelaya dabbaalkii war labaadaada dameer isku dar, seebaan isugu daraa farsa-ma yaqaanka u gey oo isku dar dheh, markaa buu u geeyey farsama yaqaankii oo yiri labaadaan dameer oo caatada ah isu-gu kay, dar wuxuu yiri meeqa isiineysaa laba boqolbaan ku sii-nayaa lixbilood ka dib baan kuu imaanayaa, farsama yaqaankii-baa labadii dameer oo caatada ahaa beer geeyey oo cayiliyey markii lix bilood la joogay baa dabbaalkii u yimid farsama ya-qaankii, labadii dameer ma isku dartay haah buu yiri ee labadii boqol oo sh. isii markaas buu farsama yaqaankii labadii da meer oo cayilay buu mid xaday midkii kalana wuu siiyey laba-dii boqolna waa ka qaatay sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## WAN IYO DHURWAA

Dhurwaa baa arkay wan dooxo cidla ah jooga markaas buu wuxuu yiri dhurwaagii waryaa kula joogay markaas buu yiri qofna wuxuu yiri feeraha ayaan la'ahayey mana qosli kare ee runta miyaa, markaas buu wuxuu yiri wankii waa runtay

oo kaligey baan ahay markaas baa dhurwaagii qosol la dhacay intuu qoslayey dhurwaagii ayaa wankii cararay sheekadii halkaas ha inoo joogto.

## LABA DAMEER OO FAKADAY

Laba dameer oo ah walaalo baa reer raranjireen labaadii dameer baa tashaday mid baa wuxuu yiri war gumeysigaan ee reerkaan sideebaan uga baxnaa kii kalaa wuxuu yiri markii caawa la gaaro aan fakanno oo baadiyaha aadno kii kale wuxuu yiri waa yahay, markii cawadii lagaaray bay fakadeen oo duurka aadeen markey muddo joogeen duurkii baa jiilaal ku kacay markaas baa midkood wuxuu yiri war jiilaal baa nagu kacaye, reerkii baan aadayaa ee adigu ma iraaceysaa, wuxuu yiri kuma raaci karo oo Ilaahay baa jiilaalkaan iga saari kara reerkii gumeysigiisii iyo rarashadiisii baa iiga daran, markaas baa meeshaas lagu kala tegey labadii dameer ee walaalaha ahaa mid reerkii buu u noqday midna baadiyaha ayuu ku haray, kii soo noqday baa reerkii yimid ninkii raranjiray baa arkay markaas baa wuxuu yiri war xaggee aaddeen kii kalese aaway, wuxuu yiri dameerkii baadiye baan aaday markaan baahanana anigu soo noqday kii kalana waa iga haray, markaas baa wuxuu yiri war i soo tus, markaas baa laraa diyey dameerkii kale waxaa loo tegey dameerkii oo roob u da'ay oo cayilay oo geeso dhaadheer yeeshay markaas baa laga soo cararay biciidka maanta duurka jooga waa dameerka fakaday, oo gumeysiga diiday, dameerka dadku rartana maantay waa dameerkii gumeysiga u soo laabtay halkaas hanoo joogto.

## GABADHII GACANTA LAGA GOOYEY

Nin Suldaan ah baa gabadhiisii goor jiilaal ah Toban muufo u diray markaas bay muufadii soo gadday markaas miskiin ka baryey muufadii markaas bay mid siisay markaas bay guriga ay timid sagaalkii muufo oo soo hartay bay Aabbaheed u kentay markaas buu wuxuu yiri naa halka maqan meeyey waxay tiri miskiin baan siiyey wuxuu yiri gacantee ku bixisay midigtaan ku bixiyey bay tiri markaas buu ka gooyey gacantii oo la eriyey markaas bay Tuugsi Xaafadaha u doonatay habar baa aragtay gabadha oo tuugsaneysa markaas bay u yeertay oo tiri naa wiilkeygaan kugu darayaa ee Tuugsiga iska daa

markaas bay tiri haye gabadhi markaas baa wiilkeedii u guurisey, markaas baa Ilaahay gabadhi gacanteedii u soo celiyey halkaa hano J.

## NIN WIIL LAGA DILAY

Nin baa wiil laga dilay markaasu buu Qaalli u dacwooday oo markaas yiri Qaalliyow wiil baa layga dilay markaas baa la yiri u yeer ninkii wiilka kaa dilay, markaas baa loo yeeray ninkii wiilka dilay wiilkaan maadaa dilay baa la yiri markaas buu wuxuuuu yiri anaa dilay markaas qaalligii wuxuu yiri wiilka la dilay habartii ma joogtaa haah baa la yiri u yeera ayaa qaalligii yiri marki loo yeeray baa ninkii wiilka dilay baa waxaa la yiri habartii kaxeyso oo wiil ka soo dhal una keen ninkii wiilka aad ka dishay, ninkii wiilka dhalay baa wuxuu yiri qaalliyow wiilkeygina ma la iga dilay nagteydina ma ugu dartay dood ayaan ka qabaa, halka hannoo joogto.

## NIN MA DHERGE AH

Nin baa reer ku soo hoyaday markaas baa waaxa u timid haweeyneydii reerak markaas bay waxay tiri ma nabad baa waa nabad buu yiri waase jiranahay oo calosha ayaa leyga hayaa oo waxaan u socda Wadaad i daaweynaya maxaa yeelay cunnadi baan cuni kari waayey, markaas bay xoogaa saliid ah u keentay gabarna muuf a ayay ugu dirtay muufadaas oo ah 4 xabbo intii ay muufadii ku maqnayd buu saliidii cabbay markay muufadii keentay gabadhii hooyey u sheegtay oo waxay tiri ninkii wuu cabbay saliidii ee maxuu ku cunayaa muufaha habarti waxay tiri naa saliid kale u doon waa u keentay markaas buu muufadii cunay intii ay ku maqneed saliidii waxay u keentay habartii dhiil caana ah iyo bariis subag leh markaas bay waxay tiri habaartii adeerow haddaad soo bugsooto hanna soo marin adoo jiran baan wax ku deeqsiinweynay ee adiga oo fayow wax kuma deeqsinkarno, sheekadii halkaas hanno joogto.

## NIN IYO RATI

Rati iyo nin baa isu abaal sheegtay ratigii wuxuu yiri nin yahow ma ogtahay inaad aniga igu nooshahay ninkii baa waxuu yiri kuguma nooli ee waa isku noolnahay ratigii baa wa-

xuu yiri dusheydaad ku nooshay oo way raratää ninkiibaa waxuu yiri kuma nooli ee waa isku noolnahay waxaana u daliil ah qoryihii aan soo guray adna aad soo qaaday waa laga gaday oo lix shilin baa lagu gaday saddex shilin, caws baa lagugu gaday seddex shilina aniga muufo ku gatay, sheekadii halkaas hano joogto.

## GABAR JIRAN

Nin baa gabar reer ka guursaday markaas baa gabadii goorti loo gurigeeyey bay jiratay oo la bugsayn kari wayey lix sano markay jiraneed kanow sheekh matahay kanow taqtar ma tahay ee la noogay baa loo geeyey Wadaad Sheekh ah markaas baa waxaa la yiri sheekhow gabadhaan waa jirantahay sidii ninkaan loogu daray waa jiraneed sheekhi baa Kitaab u furay markaas baa wuxuu yiri sheekhi gabadhan Aabbaheed alaabtii ay u karin jirtay Subaxa hore maxuu ahaa markaas baa waxaa la yiri wuxuu ahaa Bun iyo qaxwo bay u dubi jirtay una karin jirtay hadana Bun u duba qaxwana u kariya gabadha markaas bay gabadhii bugsootay, sheekadii halkaas hanno J.

## DIIN DHAANSHEY

Diin baa wuxuu yiri anigaa reerka u dhaaminaya beriga ee ratiga ii soo rara markaas baa loo soo raray ratigii oo loo dhiibay hogaankiisii markaas buu kaxeeyey seddex beri haddu sii maqnaa baa sharqantiisii la maqlay markaas baa la yiri alleylehe Diin waa keenay dhaankii markaas buu wuxuu yiri war waa anigoo sii socdee ha igu cayaarrina, halkaas hanoo joogto.

## NIN TOBAN DAMEER WATA

Nin baa 10 dameer watay markaas buu mid ka soo fuulay kolkow cabaar soo waday buu tiriyey markaas buu mid waayey markaas buu gadaal u doonay markuu soo waayey buu nin heybiyey ninkii baa wuxuu yiri meeqaad wadatay wuxuu yiri 10 dameer baan watay oo hal baan waayey markaas buu u tiriyey oo yiri 9 waatan midna adiga ayaa ku fadhiya markaas buu ka degay oo yiri dameer dambe fuuli maayo intii uu iga dhumi lahaa, halkaas hanoo joogto.

## GABAR IYO SURWAAL

Gabar baa wiil saaxiib keeda Surwaal isku beddelan jiray oo qofba mar qaadan jiray markaas bay gabadhii muuddo ka dibayadoo riman la arkay gabadhii baa la yiri naayaa ku rimiyey ma aqaan bay tiri odoyaal baa la isugu yeeray waxaa la yiri gabadhaan waa rimantahay waana gabar inan ah, odayaashii waxay yiraahdeen gabadhaan surwaalkaa rimiyey marna ayadu qaadaneysay marna saaxiibkeeda qaadanayey, sheekadii halkaas hanoo joogto.

## NIN SADDEX DUCO LA SIIYEY

Nin baa qoraya guran jiray oo miskiin ah saaxibul ciyaalna ah markaas buu qoraya soo gurtay asagoo sita qoryihii buu daalay oo dhigtay dhulka markaas buu Ilaah baryey oo yiri Ilaahow iga saar faqriga oo khayr isii markaas buu wuxuu arkay nin tima weyn oo qurux badan oo dharcad qaba markaas buu wuxuu yiri Ilaah waa kaa aqbalay ducadii seddex baana lagu siiyey markaas buu miskiinkii nagtiisii u yimid markaas buu wuxuu yiri seddex duco ayaa nala soo siiyey ee maxaan ka dhigana oo aan Ilaah ku barinaa waxay tiri midda u horeysa aniga sannadkeyga hal lagu yareeya markaas buu yiri Ilaahow 15 jir iiga dhig siddeetan jir weyee markaas baa la yareeyey markaas bay ka carartay oo tiri duq baa tahay markaas buu yiri Ilaahow eey ka dhig markaas bay eey noqotay markaas buu carruurtii hayn kari waawey oo warrsaday markaas buu yiri Ilaahow 80 jirkeedii u soo celi seddexdii duco halkaa bay ku dhammaatay, halkaas ha noo joogto.

## NIN IYO MUKULAAL

Nin baa wuxuu ku soo eedeeyey mukulaal inay ka cuntay seddex kiilo oo hilib ah, Qaalliga hortiisa markaas baa qaalligii wuxuu yiri miisan ii keena markaas baa miisaankii loo keenay markaas buu miisaankii saaray mukulaalshii markaas bay noqotay seddex kiilo mukulaashii oo dhan qaalligii baa wuxuu yiri hadday mukulaashii seddex kiilo noqotay seddex kiilana cuntay ee hilib ah been baad sheegeysaa adigaana seddex bilood ku xiray ayadiina waan sii daayey, halkaas hanoo joogto sheekadii.

## NIN GAAJO HEYSO

Nin gaajo bestii la ha oo derbi yaal baa la arkay markaas baa dad badan ku soo aruuray nin dadka ka mid ahaa oo reer ladan ka tirsan baa wuxuu yiri war ninkaan maxaa ku dhacay waxaa lagu yiri gaaju bestii la yahay markaas buu wuxuu yiri oo muw xalwo ka dhergo iyo bariis subag leh, markaas baa qosol lala daatay oo la yiri war ninka baahida derbiga layaal miyaad ku leedahay xalwo iyo bariis subag leh ka dhereg markaas buu iska tegey asigoo isla fiican, halkaas hanoo joogto.

## SEDDEX TUUG OO WAN XADAY

Seddex tuug baa reer u soo dhacay oo wan ka xaday markaas baa dooxo cidla ah la la tegey wankii oo lagu qashay, markaas baa la karsaday hilibkiisii markay bisleeyeen baa mid tuugadii ka mid ah baridii iyo leggii xaday markaas baa la yiri war leg iyo baridii aaway markaas baa nin walba inkiray mid baa wuxuu yiri iska daaya leg yo bari xade asagaa soo bixi doone markaas baa waxaa la arkay ninkii wanka laga xaday oo soo ordaya markaasaa laga cararay cabbaar haddi la orday leg iyo bari xade ayaa kufay oo dhintay, sheekadii hakaas hanoo J.

## WEYDIIN IYO WAX KA DHEH

— 1 —

Ma sheegi kartaa:
Cilmiga Sixirka la yiraahdo Ciddii dhulka keentay?
Ha waa Haaruud iyo Maaruud oo ahaa labo Malag.

— 2 —

Ma ii sheegi kartaa:
Afarta nafley oo aan hooyo iyo aabbe aan laheyn?
Haa waa Aadan iyo Xaawo iyo Wankii Nabi Ismaaciil iyo U-shii Nabi Muuse nabad geliyo iyo naxariis kor kooda ha ahaa-

— 3 —

Ma ii sheegi kartaa:
Afarta Nebi ee nool maanta labana Cirka jirto labana dhulka joogto?
Haa labada Cirka joogta waa Ciise iyo Idiriis labada lhulka joogtana waa Ilyaas iyo Khadar Nabad gelyo kor kooda ha ahaatee.

— 4 —

Ma ii sheegi kartaa:
Geed dhulka ka soo baxa kii ugu horreeyey, haa waa geedka saadka (Zaadka).

— 5 —

Ma ii sheegi kartaa:
Dhagaxa jannada ilaah ka keenay oo dhulka yaal maanta?
Haa waa dhagax madoobaha Kacbada yaal.

— 6 —

Ma ii sheegi kartaa:
Ninka dadka oo dhan ugu dheeraa?
Haa waa Cooj Bin Cunuq oo ahaa 23333 dhudhun.

— 7 —

Ma ii sheegi kartaa:
Hashii geel-oo dhan ugu caano badnyed?
Haa waa hashii Nabi Saalax korkiisa Nabad gelyo iyo naxariis ha ahaatee.

— 8 —

Ma ii sheegi kartaa:
Nabigii kalluunku liqay?
Haa waa Nabi Yoonis korkiisa nabad gelyo iyo naxariis ha ahaatee.

— 9 —

Ma ii sheegi kartaa:
Aadan iyo Xaawo kii hor dhintay?
Haa waxaa hor dhintay Aadan wuxuuna dhintay maalin jimce. Xaawana hal sanno ka dib bey dhimatay.

— 10 —

Ma ii sheegi kartaa, Nabi Aadan hortiisa yaa joogay dhulka? Haa waxaa kamid ahaa Shimbiraha iyo kallunka iyo nafleyaal kale.

— 11 —

Ma ii sheegi kartaa meeshii, uu ku dhintey Nabi Aadan? Haa wuxuu ku dhintey dalka Hindiya, waxaana ka soo qaaday Nabi Nuux kadib markii duufaantu kacday oo beytal maqdis ku xabaaley.

— 12 —

Ma ii sheegi kartaa:
Nafleyda mar ku socota afar, marna ku socota laba marna ku socota saddex?
Haa waa dadka, marku gurguuranayo iyo marka uu xoogaabo iyo marku duqoobo.

— 13 —

Ma ii sheegi kartaa:
Waxa markii aad aragto dhinta?
Haa waa beenta.

— 14 —

Ma ii sheegi kartaa:
Waxa markii la buuxsha iyo markey maran yihiin isku miiisanka ah?
Haa oo waa saacadda.

— 15 —

Ma ii sheegi kartaa:
Indhaha nafleyda saaxiib la'aan wax ma arkaane saaxiibkood?
Haa waa nuurka, haddaad aqal mugdi ah gasho oo iridda xirto waxba ma arkeysid·

# SOOMAALI
# BEEN MA
# MAAH MAAHDO

1) Dab iyo Dowlad lama agjoogsado.
2) Been waa lagu cabaa ee lagu ma rakaato.
3) Hadal intuu uur kaaga ku jiro buu amaan kuu yahay.
4) Doqon iyo naag nimay legdaan kama kacaan.
5) Hadal lama agjoosado ee geed baa la agjoosadaa.
6) Hadal lama wadaagee caanaa la wadaagaa.
7) Madax muuqda iyo middi saawira midna lagama samro.
8) Nin weyn iyo umuliso siday wax u ogyihiin wax uma sheegaan.
9) Hadal af dhaafay afaaf dhaaf.
10) Hadal waa ama dheh ama dhegeyso.
11) Hadal ama hee ama haah weeye.
12) Adduunyo ama sheeka ama shaahid.
13) Ama beec baro ama been baro.
14) Beeni raad ma leh.
15) Kalluun mar baa la gowracay.
16) Hadal haan ma buuxiyo.
17) Far bugta faraha ka dheer·
18) Far bugta faraha ka dheer.
19) Run iyo been kala raad leh.
20) Run iyo roob lagama reysto.
21) Fal aan laabta jirin faro wax uga daran.
22) Nin badi qaaday xumbo cuskay.
23) Talo adigaa ku nool ee ayadu kuguma noola.
24) God walaal ha qodin haddaad qoddana ha dheereyn ku dhici doontidana lama ogee.
25) Talo waa maraad garan weydo iyo maraad gaari weyso.
26) Sagaaro laba tun oo la kala qaybsho ma leh.
27) Naagu waa tii hadalkaaga maqasha hantidaadana dhowrta.
28) Adeeg ma cabsado ee ninkiisa cabsada.
29) Gadaal ka gaar waa goob dumis.
30) Libaax nin ganay iyo nin galaday ma mooga.
31) Ood qaad iyo jiid waa isla guri geyn.
32) Lama huraan waa cowska jiilaal.
33) Nin kuu digay kuma dilin.
34) Banaankiisa mare maradiisa geed ma qabsado.
35) Laba qaawan isma qaado.
36) Nin soori kaa qaaday waa nin seefi kaa qaaday·
37) Miskiin baa miska la fuula leh.
38) Gar laba nin kama wada qosliso.

39) Ninkii seexdaa sicii dibi dhalay.
40) Ilko wada jir bay wax ku gooyaan.
41) Miro gunti ku jira miro geed saaran looma daadiyo.
42) Hadal iyo hilbo waa la qeexaa.
43) Meel il laga la'yahay haddaad tagto ilbaa layska ridaa.
44) Intaadan wax falin ka fiirso.
45) Gacal waa gacmo is dhaafay.
46) Wax badso wax beel leh baa jirta.
47) Facaa ka her fool xumo ma dhaafo.
48) Dani waa seeto.
49) Wax uurka ku jira oo afku kaa xado ayaa jira.
50) Wax hubso hal baa la dhaafsadaa.
51) Habar fadhidaa legden la fuduyahay.
52) Geel laba jir soo wada mar.
53) Naagu yaraan ma leh.
54) Mukulaal minankeeda joogta miciya libaax bay leedahay.
55) Habar roob hayaa habar walba in roob hayey moodaa·
56) Meel madaxa ka sareysaa oo la salaaxaa ma jirto.
57) Hadal badan hilmaan buu leeyahay.
58) Tala nin kuma filna labana ku heshiin weydey.
59) Gacani waxay heyso goysaa.
60) Sidaa dooneysa haddaad weydo sidaa ka badinweyso baa la yeelaa.
61) Fadhi iyo fuud yicibceed laysku waa.
62) Hadal waa murti iyo yoon yoon.
63) Nin iyo jiilaal way legdemaan.
64) Quud aan jirin qoryo u guro.
65) Hal booli ah nirig xalaal ah ma dhasho.
66) Laabi laba ula'.
67) Xaajo nin aan ogeyn indhuhuu ka ridaa.
68) Xaajo dibna la qabto bay leedahay ee daba la qabto ma leh.
69) Dhul nin gamay ma gefo.
70) Nin aan tali jirin hadduu taliyo nin aan tegi jirin baa taga.
71) Nin aan qeybin jirin hadduu qeybiyo nimaan qadi jirin baa qada.
72) Nin wax la tuur leh nin la toosan.
73) War la'aan waa is wareysi la'aan.
74) Hadba sida loo jabaa loo dhutiya.

75) Fal waa fara ku heyn.
76) Adigoo harsan waayey ma laguu soo hargalaa·
77) Madi isma yeel yeesho.
78) Nin aan baqin waa loo baqaa.
79) Talo walaal diidee turaan turoo ma huro.
80) Meel hal lagu qalay mana hilib yara mana hadal yara.
81) Haween waa balaayo loo baahan yahay.
82) Naagu nin ay taqaan col ma moodo.
83) Shimbir maalin bay debqaaday aqalkeedii iyo aqalkii habarteed bay ku gubtay.
84) Waayeel xanuunsaday xil ma garto.
85) Meel hadal u baahan hoo wax kama tarto.
86) Meel hoo u baahan hadal wax kama taro.
87) Xamarna xeer baa lagu degay Xaradheerana xoog baa lagu degay.
88) Abaal raaga rag baa leh.
89) Sidee baa xeega loo xagtaa ilkana ku nabad galaan.
90) Xagla laaban xoola kuma yimaadiin.
91) Danti mooge mara duug ah horteed buu dhammaadaa.
92) Matag meesha aad rabto kuma gaarsiyo.
93) Nin gardaran ma guuleysto.
94) Meel marreey xukunto iyo maal dameer la saaray murug maarug baa u dambeysa.
95) Qeylo gar dhoweysay.
96) Nin ooman biyahaan hoo baa deeqda.
97) Hadal yar iyo hawl badan·
98) Sirma qabe alaa u sahan maqan.
99) Nin aan qooq dilin maroodi ma dilo.
100) Ayax teg eelna reeb.
101) Nin barxaday baq.
102) Wax ged geddi wax ha kula gaddoomeene.
103) Waxaan dhib loo marin dheyel laguma helo.
104) Raad arooryo gadaal looma raaco.
105) Nin samraa sed leh.
106) Naag ama u samar ama ka samar.
107) Hadalna rumbaa lagu cadeeyaa ilkana rumay.
108) Haween taad barataaba ba'an.
109) Aqoon la'aan waa iftiin la'aan.
110) Iskaashato ma kufto.
111) Kaboole ma haree kab laawe hara.
112) Cimri tegey ceeb laguma sagootiyo.

113) Wax rag kaa galay rako kaa gale.
114) Rag aamusay iyo riyo aamusay reerkoodii gabe.
115) Ama afeef hore lahaaw ama adkeysi dambe lahaaw.
116) Nin aan kuu furidoonin yuu kuu rarin·
117) Mulac carruurto cayaar bay u dishaa asna waa ka naf.
118) Runti sheege waa rabbi ka yaabe.
119) Dhicisku inta midida loo soo sito ayuu dhinta.
120) Tan tagtay daa ee tan joogta qabo.
121) Diqsi inta laysga dhiibo buu ku dhintaa.
122) Nin aan shaqeysan shaahi waa ka xaaraan.
123) Nin aan dhididin ma dhergo.
124) Soomaali been ma maah maahdo.
125) Nin waa intii naag ka soo hartay.
126) Reer kala guurayoo ninba naagtiisii raacday.
127) Harbtii dherigeedu buuxo waxay mooda habar walba in dherigeedu buuxo.
128) Dawaco meeshii ay macal uga barato bay macluul ugu dhimataa.
129) Waxaad barataa waa baaskaa.
130) Il ribix arkee rixin ma dhowrto.
131) Rag naaga is dhaafiyey.
132) Ciil naago kaa raacay iyo caro nirig geel kaa raacay midna lagama buskodo.
133) Hadal nin badiyey mawada oran nin yareeyeyna kama wada tegin.
134) Rag waa nin naag guursaday iyo nin naakira guursaday.
135) Dudun in la dugsado iyo in la dardensado layskuma daro.
136) Laba darran kala dooro.
137) Naag naagu eryeyso iyo owr owr eryayo midna kaama leexdaan·
138) Naag la'aan waa naf la'aan.
139) Nin xasilan xafar ma rido.
140) Meeshaad madaxdeeda tahay majaheeda layskamaa dhigo.
141) Hadal marqaati leh iyo hilib middi leh laguma mergado.
142) Nin buka boqol u talisay.
143) Cadaab huriyow shiddaan nacay.
144) Ballan waa deyn.
145) Is moog aqalkey asleysaa.

146) Gardarro garba og iyo gaajo guri og midna lagama kaco.
147) Nimaad dhashay kuma dhalin.
148) Nin baa nin dhala.
149) Waarimeyside war ha kaa haaro.
150) War meel dheer buu ku dhacaa waranna meel dhow.
151) Dhaba yar baa dhaba weyn kuu gceya.
152) Barruur keliya barruuro qurmisa.
153) Dantaada maqaar eey baa loogu seexda.
154) Habaar waa habaar waalid.
155) Tuug tuug ma xado.
156) Tuugo kula taal tab kaama weydo.
157) Hilmaan hadal kuma jiro.
158) Tuug tuug buu ku mooddaa·
159) Gacalkaa gacmo u waa.
160) Ninkii labaatan jir ku seexda lixdan jir buu ku ordaa.
161) Qeybshaa ma qado.
162) Cowska jiilaal canba can buu bidaa.
163) Dhagax taabasho iyo tuujis waa isugu mid.
164) Fulay ceerinka ma cuno biseylna ma sugo.
165) Kun qof ma barido.
166) Lax iyo laxow meel ma wada maraan.
167) Ceeb kun ogtahay kowda looma sheego.
168) Nin aan dhul marin dhaaya ma leh.
169) Nin dhumaya dhug ma leh.
170) Nin baa ceesaanti ceel gee.
171) Geel carruuri qaaday ma dheera.
172) Carruur qeylada waa qaboonada.
173) Bil seddex kuma guri geyso.
174) Hadal aan fiiro loo oran iyo caano aan fiiqsi loo dhamin feerahay wax yeelaan.
175) Saaxibka maantay waa cadaawadaa berri
176) Shimbir aad heysato waxay kuu dhaantaa laba maqan.
177) Masugto meher ma leh.
178) Nin gu' kaa weyn il guraxeedna kaa weyn·
179) Hashu maankeyga gadaye ma masaar bay liqday.
180) Samir tabar waa baa jira.
181) Xabaala qode xabaashiisaa la qodaa.
182) Maxay ka nuugtaa maxayse ku nuugta.
183) War la qabo xiiso ma leh.
184) Gacno geel jire hoos baa loo dhaqaa.

185) Layskama dabatagee waa layska feer tagaa.
186) Mas ineuusan kugu candhuufin baa lagu candhuufaa.
187) Gurbaan ama gacanta ha kugu jiro ama gacalkaa ha kuu hayo.
188) Maroodigu takarta saaran ma arkee maroodiga kale tan saaran buu arkaa.
189) Af wax cunay xishoo.
190) Xaasid ma bulaalo.
191) La jifiyaana bannaan la joojiyaana bannaan.
192) Sirtaada naag looma sheegto.
193) Waxaan ku cinin ba waa la cunaa.
194) Hadal waa margi.
195) Qeyl dameerdaad isku halayn buu habarti dabada uga nuuga.
196) Riibi geeda ma daaqo lagamana daaqo.
197) Qar intuu jiray quruuruxna waa jiray.
198) Jirkii la haye jiriid kama qoslo.
199) Jidiin baa walaal ah ee jiir walaal ma ahin·
200) Calaf waa intii calool gasha.
201) Barya badan iyo bugta badan waa laysku nacaa.
202) Naftaada ka qaad naf walaalka sii.
203) Doqontii laaq weydaa duray bay hafrataa.
204) Arrin nin galay eed gel.
205) Weyssha gowrac dibigu ha ku quustee.
206) Dibiga doollood ishiisu wax xun ma aragto.
207) Hilib waa nin waayey iyo nin dabada ku xirtay.
208) Cagi jid cadeysay.
209) Dhal magaalo intii la noqdaa waa dheertay dhar magaalo intii la qaataase waa dhowdahay.
210) Deyn bixiye dirir ma gafo.
211) Amaana kugu raagtay xoolahaada ayaad moodaa.
212) Xoog waxaa u liita kii xarigga kaa gooya.
213) Xaaraan xero ma buuxiso.
214) Roonaa rabbaa og.
215) Ratiga dambe ratiga hore saan qaadkiisa buu leeyahay.
216) Ninkii walaalkii loo xiirow soo qoyso.
217) Naftu orod bay kugu aamintaa.
218) Markaa tabar hayay talo ma heyn, markaan oo talo haayo tabar ma haayo.
219) Ilaah waa wadaan wade wabigiina waa ku geeyaa.
220) Saluuggaa sad baa ka daca.

221) Talo isuma kaa sheegto.
222) Xaajo waa tii la soo gaabshaa.
223) Xoog haddaad weydo xeel ma weysid.
224) Fariin waa qaan.
225) Nin gabban jiray loo ama gabbado.
226) Intad qaleysay annaa qeybinayey.
227) Wax kaleba isi saaraye laba tagoo good isma saarin.
228) Habeen kaad dhereg filanayso gaajana filo.
229) Miro barde cayayuub baa loo cunaa.
230) Dabkaad kulkiisa aragto danbaskiisa laga leexda.
231) Dhul iyo wax la dhalay baa loo marti yahay.
232) Ma awal baan laba ku lulayey mase wiliqsi baan wayey.
233) Haddii kabo la ii tolo alxamdu lila haddaan waayana waayey.
234) Laako sagaaro raq mooyey ruux isma taraan.
235) Tuugmo Aadane tuur bay kuu yeeshaa.
236) Intaad qaleysay annaa waa qaybinayey.
237) Muruqa laba suule ninba si ku ah.
238) Doqoni meel lagu diriray bay ogeed ee meel lagu heshiiyey ma ogeyn·
239) Hadal waa johorad.
240) Barti yaqaan bar uma kororto.
241) Habeenkii waa inta gacantaadu gaarto, maalintiina waa intii ishaadu gaarto.
242) Maskaxdu miyir bey u magantahay.
243) Nin labo jir u fuushan yahay lama xanto.
244) Bakeelow nin iyo bur.
245) Suul farro ka gaaban.
246) Labadii ceerinka ku qaybsata biseel kuma dirirto.
247) Nin wuxuu xil moodo baa nin xarago mooda.
248) Qanje ka guur oo kud u guur.
249) Cesaan ari i sii ninkii kugu dhiba, wadideedaa lagu dhibaa.
250) Ma heysaa qaali, ma rabtaa raqiis.
251) Ma gaabo geel gelin bey ku wadaa.
252) Qurux af bey ku taal.
253) Nin tag lama yiraahdo, ee wuxuu ku tagaa la tusaa.
254) La hel la hel la waa baa xigta.
255) Wax badan joog aad wax aragtide.
256) Adduunyo nabad bey ku nooshahay.
257) Habar iyo hayinkeed isla raran.

258) Rabbi talo ku filan.
259) Cantuugo jiilaal canba can buu bidaa·
260) Waxaad qarsataa waa ku qarsadaan.
261) Xaq feeruu ka dillaacaa.
262) Been fakatay run ma gaadho.
263) Luun lixo aragtay lixaad ma weydo.
264) Hal laac aragtay lun hoose ma aragto.
265) Faras iyo nin fuushan isma qalbi oga.
266) Kab gantaaleed ninba si u gan.
267) Haw raarrey ninba si kuu yiri.
268) Harag ari iiga kac mooye iiga durug ma leh.
269) Nin faas leh qoryo ma waayo.
270) Ninba wuxuu doonuu door bidaa.
271) Kas waayeed kabbo isma dheera.
272) Hubkaa kaa war dheer.
273) Ninkii aad jeceshahay eeygiisaa la jeclaadaa.
274) Dhar aadan lahayn dhaxan kaama cesho.
275) Geel maalin buu ceel joogaa.
276) Rag ciil cadaab ka dooray.
277) Kun saaxiib waa yartahay, hal cadow waa badan yahay.
278) Haddii dhiig yimaado dhabbaqo meel beeshay.
279) Ninna xuunsho xoolo ma moodo·
280) Madax madaw baa miyir ku dambeeyaa.
281) Wixii muuqdaa muhiima gala.
282) Rag waa raggii hore, hadalna waa intuu yiri.
283) Kor waayeel waa wada indho.
284) Ammaan lama dhulhumiyo.
285) Bariis markuu kaa dhergo baad ka dheregtaa.
286) Nin fadhiya lama legdo.
287) Hal libaax arkeysaa ma godlato.
288) Nin ciil qaba lagama adkaan.
289) Qoor dheer madax ma dhaafto.
290) Dad waa dadkaan dambe, hadalna waa intuu oran doono.
291) Raqba waa ku raggeda.
292) Majo ari hawl u qaybsan.
293) Ari been waa didaa, umase dhutiyo.
294) Fiintu waxay ka ooyda, waxa soo socda.
295) Habar dheregtay dhallinteed ma oga.
296) Kaadi badane waa loo gogol badiyaa.
297) Nin tuur leh suu u seexdo isaga yaqaan.

298) Maalgaaku ha i bixin buu ku yiraahdaa, haddii aad i bixisana haygu daba dhiman.
299 Nin ku diley hoos kuma jiido.
300) Nin shimbiro gaadaya waraf ma tuuro.
301) Ballan habeen ka lah arrooryo buu lxyahay.
302) Baadi lo'aad biyaa loo fariistaa.
303) Timirtii horaba dab loo waa.
304) Calool dheregtay caqli ma leh.
305) Hadal ma ba'na ee hadal xuma ba'an.
306) Xaq feeruu ka dhilaacaa.
307) Qaani ma qurunto.
308) Ridii ma lakeed galaa madax shabeel bey leef-leeftaa.
309) Lagaa baray oo lagaa badi.
310) Ul dameer ku dhacday aakhirey ku sugtaa.
311) Magac miskiin lagama aha.
312) Yaan lagaa badin.
313) Dani xishood ma leh.
314) Wax laqarsha ama qubte ama qurme.
315) Nin waalan waano diid.
316) Meel lagaa jecel yahay haddaad ka tagto, meel lagaa necebyahaa tagtaa.
317) Xarig habeen ninkii xiraa fura.
318) Dad nin kaliya ka gunaanad yaqaan wey gunaanad see-gaan.
319) Laba dhaxal ku dirireysa dhalasho ma fiirshaan.
320) War annaba kab geeyey·
321) Nin geelisii dhacay lagama dhacsho.
322) Doqon daawo ma leh.
323) Ninba wuxuu qabo qardhuu keeni.
324) Waxaad qarsato waa ku qarsadaan.
325) Nin aan ku aqoon kuma tixgelyio.
326) Nin ku siray wax kuu sheeg.
327) Nin is faanshey falar baa maqan.
328) Doonni buuxda bad looga teg.
329) Ciirtaada dhamme baa ceebtada yaqaan.
330) Uur jiif habartii ku gawracan.
331) Waxaad qabto ninkii qabaa lala degaa.
332) Damac badne dariiquu ku dhintaa.
333) ) Nin miyir qabaa marti soora.
334) Qofkii soo joog laga waayo, soo jiifsaa laga hela.
335) Ceelna uma qodna, cidna uma maqna.

336) God aakhiro gadoon ma leh.
337) Il adag aroos keeday ka boodaa.
338) Amma ceyrow amma ceebow.
339) Adaa qooysanaayee yaa kuu xiiraaya.
340) Nin waalani webi taraar·

Buugaan waxaa soo qoray Jaalle Xasan Yacquub Maxamed oo ku magac dheer «Baab-raqiis» waxaana ku qoran 340 murti iyo maahmaah ah, waxaa kaloo ku qoran 23 sheeko iyo 15 weydiin iyo wax ka dheh.

Ma taqaan XASAN YAQUB?
Haa waa nin Soomaali ah oo ku dhashay Xamar 1929kii, wuxuu ka soo qeybqaatay gobanimadoonkii S.Y.L. ee loo doonayey gobanimada 5 (shanta) Soomaaliyeed wuxuu kallo magac weyn ku lahaa Xagga Ganacsiga waxaa loo yaqaaney Baabu Raqiis.

Haddeerna waa qoraa wuxuuna qoray Buugga la yiraahdo «**ADDUNYO WAA SHEEKO IYO SHAAHID**» **wuxuu** kallo qoray Buugga la yiraahdo « **WAARIMEYSIDE WAR HA KA XARO** », iyo Buuggaag kalle oo fara badan.

Qore Jaalle Xasan Yacquub Baaba Raqiis